

2. Ood aragtid Dadkoo Diinta Eebe u soo gali Kooxo.

وَرَأَيْتَ أَنَّاسَ يَدْخُلُونَ فِي دِينِ اللَّهِ

أَفَلَا جَاءُوكُمْ


3. U tasbiixso Eebe adoo ku mahadin Dambidhaafna waydiiso illen waa dambidhaaf badanee.

فَسَيِّئَ حَمْدَرِيكَ وَأَسْتَغْفِرُهُ إِنَّمَا

كَانَ تَوَابًا

Suuraddani waxay soo dagtay Ayaamihii u dambeeyay ee noloshii Nabiga Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee, isagoo Eebe fari in Marka Magaalada barakaysan ee Maka la soo celiyo Dadkuna Islaannimada koox koox u galaan inuu Nabigu cibaadada Eebe badiyo kana toobad dalbo. Waxayna ku tusin Suuraddu Nicmadoo lagu shukriyo, iyo in Eebe Diintiisa u Gargaari, waxaa kaloy ku Tусину Ajashii Nabiga nabadgalyiyo naxariis korkiisa Eebe ha yeelee.

Nin Daris u ahayaa Jaabir Bini Cabdillaahi yaa wuxuu yidhi: Waxaan ka soo galay Safar markaa suu ii yimid Jaabir bini Cabdillaahi ina Salaamay, Markaasaan ugu sheekheyay suu Dadku u kala tagay iyo waxay la yimaadeen Markaa suu Jaabir ooyay, isagoo leh: Waxaan Rasuulkii Eebe ka maqlay Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa ha yeelee isagoo leh (dadku waxay ku galeen diinta Eebe kooxo, waxayna uga bixi doonaan kooxo). Waxaa warriyay Imaam Axmad. An-Naṣr (1-3).



Magaca Eebe yaan ku billaabynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Waxaa khasaaray Gacmihi A-buulahab.halaagmayna.

تَبَّعَ يَدَآءِي لَهُبَ وَتَبَّ

2. Waxna uma tarin Xoolihiisii iyo wuxuu kasbadayna.

مَا أَغْنَى عَنْهُ مَا لَهُ وَمَا كَسَبَ

3. Wuxuuna gali Naar Olal leh.

سَأَصْلِي نَارَذَاتَ لَهُبَ

4. Haweenaydiisii Qoryaha xambaari jirtayna (waxay gali Naar).

وَأَمْرَاتُهُ، حَمَّالَةُ الْحَطَبِ

5. Luqunteedana waxaa la yeeli Xadhig Liif ah.

فِي جَيْدَهَا حَبْلٌ مِّنْ مَسَدٍ

Suuraddani waxay soo dagtay nabigu Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee mar uu koray goorSubax ah Buurta Safa Dadkan u yeedhay kuna yidhi: haddaan col idin soο weerari idin sheego ma i rumaysanaysaan, markaasay dheheen waannu ku rumaysan runna waannu kugu naqaannaa, markaa suu yidhi: Haddaba waxaan idiinka digi caddibaadda Eebe, Abuu lahabbaa markaa yidhi: Khasaare ha kugu dhecee ma waxaasaad noogu yeedhay? waxayna ku tisun Suuradduu inaan Qaraabannimo iyo Xolo, iyo carruur midna wax tarayniin hadduu ruux dhumo xaqana ka leexdo, sida Abii-lahab iyo haweenaydiisii xumaanta ku taageertay. Al-Masad (1-5).